

# CUNUGAAGU MAQABAA SHUBAN?



Halkaan ayaad kahelaysaa tilmaamaha

Shubanka cunugaaga waxaa keeni kara jeermis looyaqaano **SHIGELLA**.

**SHIGELLA** waa bakteeriya taasoo sababta kudhawaad

**[500,000 kiis]**

oo **SHUBAN AH** gudaha wadanka Maraykanka sanad kasta.

## Calaamadaha xanuunka

Astaamaha lagu garto xanuunka **SHIGELLA** caadiyan waxay biloowdaan **1 ilaa 2 maalmood** kadib marka ilmaha uu haleelo jeermisku, waxaana kamid noqon kara astaamaha:



**Shuban**  
(mararka qaar dhiig wata)



**Qandho**



**Calool xanun**

## Ilaali caafimaadka qoyskaaga iyo bulshadaada!

**SHIGELLA** sifudud ayaa laysku qaadsiiyaa!

iskuday joojinta bakteeriyada **SHIGELLA** adoo raacaaya talaabooyinkaan fudud:



**Qofkasta waa inuu dhaqaa gacmihiisa**  
• Kahor intuuusan diyaarin ama cunin cuntada  
• Kadib markuu musqusha galo ama badalo xafaayada ilmaha



**HADIYAARIN cuntada** hadaad xanuunka qabto  
**HALAWADAAGIN qofna cuntada** haddii adigga ama qofkale oo qoyskaaga kamid ah xanuunka qabo



**Joog gurigga hana aadin xarumaha daryeelka caruurta iyo dugsiga**  
Intaad jiran tahay ama ilaa waaxdaada caafimaadku kuusheegto inaad badqabto ood kulaaban karto dugsiga

## Talaabooyinka aad kubogsoonayso



**Cab cabitaano**



**Naso**



**Lahadal dhakhtarkaaga** hadaadan wali xanuunsan tahay

Inta badan dadku waxay kubogsoodaan 5 -- 7 maalmood.



U.S. Department of Health and Human Services  
Centers for Disease Control and Prevention

Booqo websetka CDC Shigella si aad macluumaad dheeri ah uhesho: [www.cdc.gov/shigella](http://www.cdc.gov/shigella)